Maxaa Loola Jeedaa in Loo Wada Siman Yahay Guryaha La Dego?

In loo wada siman yahay guryaha la dego waxaa looga jeedaa inay dadka oo dhan si isku mid ah fursad ugu leeyihiin in ay guryo kireysan karaan, in ay guryo iibsan karaan, in ay amaahan karaan deynta guryaha lagu iibsado, iyo in ay heli karaan ceymiska guryaha.

Weligaa miyey kugu dhaceen mid ka mid ah arrimaha hoos ku qoran?

- In aad aragtay xayeysiis guri abaartimenti ah oo aad taleefan kula xiriirtay aadna ogaatay in uu gurigu bannaan yahay. In aad ballan qabsatay. Laakiin markii aad gurigii timid in lagugu yiri, “Waan ka xumahay, guriga waa la kireeyey.”

- In aad raadisay guri aad iibsato, laakiin dillaalkii guryaha uu ku tusay guryo ku yaalla xaafado gaar ah. Dabadeedna uu dillaalkii ku yiri, “Waxaan u maleynayaa in ay meelahan kugu fiican yihiin,” ama “Waxaan hubaa inaadan xaafad hebla ka heli doonin.”

- In aad guri abaartment ah taleefan kula xiriirtay, laakiin markii aad u sheegtay inay kuu joogaan ilmo yar, ayaa qof guriga maamule ka ah kuugu jawaabay, “Gurigan wuxuu ku yaallaa dabaqa labaad oo wuxuu leeyahay daarad ama baalkoone; kuuma fiicna adigoo ilma yar haysta.”

- Si aad guri u iibsato in aad codsatay lacagta amaahda guryaha. Hase ahaatee in kasta oo ay beri hore ku soo martay dhaqaale-xumo, laakiin wakhtiga xaadirka ah waxaad haysataa dakhli kugu filan iyo sumcad ama kiridhit wanaagsan. Balse bangigii lacagta ayaa kugu yiri kama soo bixi kartid shuruudaha lagaa rabo.
- In aad guri iibsan lahayd oo aad isla markaana rabtay in aad hesho ceymiska guryaha. Laakiin wakiilkii ceymiska ayaa kugu yiri ceymis ma galinno dhinaca aad magaalada ka deggan tahay.

- In aad tahay qof indha la’ oo uu eey hago, laakiin qof guriga maamule ka ah ayaa guri kaa kireyn waayey sababtoo ah waxaa u yaalla “sharci ay ku diidayaan xayawaanka rabbaayadda ah.”

- In aad guri codsatay in lagaa kireeyo, laakiin kiradii iyo lacagtii horumariska ahayd ee laguu sheegay ayaa noqday kuwa ka sarreeya inta ay dadka kale bixiyaan.

Haddaba haddii ay kugu dhaceen arrimaha kor ku xusan ama kuwa la mid ah, waxaad noqon kartaa qof dhibbane ah oo midabtakoor kala kulmay guryaha.

Maxay yihiin sharciyada kaa difaacaya midabtakoorka guryaha?

Magaalada aad deggen tahay: Magaalooyin badan waxaa ku yaalla xafiisyo xuquuqda shacabka ama dadweynaha, kuwaas oo mamnuucaya midabtakoorka guryaha. La xiriir oo macluumaad weydiiso maamulka magaalada aad deggen tahay.

Gobolka aad deggen tahay: “Sharciga lambarkiisu yahay 216 “Iowa Civil Rights Act” (Iowa Code 216) ee u dhigan Xuquuqda Shacabka Iowa” wuxuu mamnuucayaa midabtakoorka guryaha ee ku saleysan **jinsi, midab, lab ama dheddig qof aad laammaane ahaan u dooratay, aqoonsi-jinsi, diin, asalka uu qof ka soo jeedo, qof ay maskaxdiisu kala dhimman tahay, naafannimo xagga jirka ah, iyo tiro ay qoys ka kooban yihiin (ama inta carruur ah ee qoyska u joogta).**

Dowladda Dhexe: Sharciga Dowladda Dhexe ee Xuquuqda Shacabka ee 1866-dii wuxuu mamnuucayaa midabtakoorka guryaha ee ku saleysan **jinsi ama midab**. Sidoo kale Sharciga Xuquuqda Shacabka ee 1968-dii, Qeybtiisa VIII, iyo Sharcigii Wax Laga Beddelay ee 1989-ka ee Dhigayey in Guryaha Loo Wada Siman Yahay waxay mamnuucayaan midabtakoorka guryaha ee ku saleysan **jinsi, midab, aqoonsi-jinsi, diin, asalka uu qof ka soo jeedo, kala dhimmanaan ama naafannimo, iyo tiro ay qoys ka kooban yihiin.**

Tirda ay qoys ka kooban yihiin, ama inta carruur ah ee guriga lagu hayo, waxa ay difaac u noqoneysaa qoysaska ay u joogaan carruur ay da’doodu ka yar tahay 18 jir. Sidoo kale waxaa la difaacaa qoysaska filaya in uu ilma uur ku jira u dhalan doono ama qoysaska raba in ay cunug isku soo wareejiyaan oo korsadaan. Keliya waxaa jirta arrin qeyb ahaan sharcigan ka baxsan, taas oo ah: guryaha loogu tala galay in ay yihiin “guryo dadka waaweyn oo keliya.”

Dadka ama shirkadaha guryaha leh waxa uu sharcigu ka doonayaa in ay oggolaadaan si macquul ah in wax looga beddelo guryahooda (taas oo ay kharashka la baxayaan dadka guriga deggan) iyo in ay si macquul ah dadka u qaabilaan sharci ahaan si ay u fuliyaan baahida ay qabaan dadka kala dhimman ee qaba naafannimo jirka ah ama mid maskaxda ah.

Maxaad sameyn kartaa haddii aad rumeysan tahay in midabtakoorid lagugu sameeyey?

La soo xiriir Guddiga Xuquuqda Shacabka ee Iowa (Iowa Civil Rights Commission). Qof Takhasus ku Haysta in Guryaha Loo Wada Siman Yahay ayaa kugu caawin doona wixii macluumaad ah, dabadeedna haddii ay noqoto in aad qoroto cabasho, isla qofkaas ayaa kugu caawin doona. Wax lacaga kuma bixineysid adeegga uu kuu qabanayo qofkaasi. Qofkaasi wuxuu cabashadaada u gudbin doonaa Waaxda Horumarinta Guryaha Magaalooyinka Mareykanka, Housing and Urban Development (HUD), si loo dhowro xuquuqdaada haddii aad soo hoos-gasho sharciga dowladda dhexe.

Cabashada waa in Guddiga loogu soo gudbiyo muddo ku siman 300 oo maalmood. Cabashada waxaa HUD loogu soo gudbin karaa muddo ku siman ilaa iyo hal sano ama maxkamad biribaati ah ayaa loogu gudbin karaa muddo ku siman laba sano.

La soo xiriir Guddiga Xuquuqda Shacabka ee Iowa

Iowa Civil Rights Commission
400 E. 14th Street
Grimes State Office Building
Des Moines, IA 50319
(515) 281-4121 or (800) 457-4416
(515) 242-5840 (FAX)
https://icrc.iowa.gov/

Saacadaha Xafiisku waa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo. Isniin ilaa Jimce. Xafiiskan farriin ayaa taleefanka loogu reebi karaa markii la doono.

Maxaa dhici doona marka la gudbiyo cabashada?

Qofkii dacwo qaba wuxuu cabashada soo gudbin karaa markuu warqad ka helo Guddiga. Shirkadda ama cidda ay dacwadu ku socoto waa in la ogeysiiyo dacwada, dabadeedna waa in la siiyo fursad ay ku soo jawaabaan.

Dacwada waxaa lagu wareejin doonaa qof danbi-baare ah; qofkaasi wuxuu noqon doonaa qof dhexdhexaad ah oo sameyn doona dabagal buuxa. Wixii markhaatiyaal ah ayaa lala xiriiri doonaa; wixii qoraallo ama rikoor ah oo jira waa la eegi doonaa. Labada dhinac ee dacwada waxaa laga yaabaa in loo bandhigo inay iskood u heshiiyaan iyaga oo aan midkoodna danbi la saareyn.

Marka baaris la sameeyo ka dib, qof xaakim ah ayaa go'aamin doona in ay arrinta jirta dhici karto (ama in uu jiro midabtakoor iyo in kale) ama in aysan waxba jirin (ama uusan midabtakoor dhicin). Haddaba haddii uu go'aanka xaakimku noqdo in aysan wax midabtakoor ah jirin, cabashada waa la joojinayaa laakiin racfaan ayaa go'aankaas laga qaadan karaa.

Marka la ogaado arrinta jirta ka dib, labada dhinac waxay dooran karaan in ay khilaafka u dhaxeeya ku dhammeystaan maxkamad degmo, ama in dacwaddooda lagu dhagesyto Guddiga hortiisa.

Maxay yihiin adeegyada uu diyaariyey Guddiga Xuquuqda Shacabka ee Iowa?

Guddigan waxaa soo gaara oo uu baaraa xalna u helaa cabashooyin midabtakoor ah oo ka soo kala jeeda meelaha shaqada, arrimaha guryaha, goobaha dadweynaha u dhaxeeya, dhinaca sumcadda ama kiridhitka, iyo waxbarashada.

Guddigan waxa uu soo diyaariyaa dad ka hadla arrimo iyo barnaamijyo ku saabsan mowduucyada xuquuqda shacabka, taasoo ay ka mid tahay arrimaha guryaha. Sidoo kale waxa uu guddigu diyaariyaa qoraallo bilaash ah, maktabad laga amaahdo filimmo iyo buugaag ku saabsan taariikhda dhibaatooyinka xuquuqda shacabka, iyo dhibaatooyinka kala duwan ee dadweynaha.

Si loogu kuurgalo midabtakoorka Iowa ka jira, sababta keentay, iyo xadka uu gaarsiisan yahay, guddigan wuxuu baaris ku sameyn karaa dadka guryaha leh, goobaha ganacsiga, iyo shirkadaha ama dadka shaqooyinka bixiyaha; waxa kale oo uu guddigu go'aan ka soo saaraa haddii lagu dhaqmay sharciyada xuquuqda shacabka.

Guddigan waxa uu la shaqeeyaa dhammaan bulshooyinka ku dhaqan gobolka oo dhan si loo sameeyo Kooxo Xoojiya Dadweynaha Kala-duwan. Si loola dagaallamo midabtakoorka iyo si looga jawaabo falalka neceybka ku lug leh, koox ayaa ka shaqeysa dhibaatooyinka iyo mashaakilaadka haysta bulsho gaar ah.

Guddigan waxa kale oo uu dhiirrigeliyaa in la sameeyo Kooxo Wada-hadal (ama dad yar oo arrin ka wada hadla), sida xiriirka jinsiyada kala duwan iyo dhibaatooyinka kale.

Hadafkeennu waa gobol aan midabtakoor lahayn.

Ulajeeddadeennu waa in la hirgeliyo xuquuqda shacabka, in lagu dhaqmo, in la taageero, in lagu heshiiyo, iyo in wacyigelin la sameeyo.

Fair Housing and You

In Loo Wada Siman Yahay Guryaha La Dego iyo Sida ay kuu Khuseyneyso

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

Guddiga Xuquuqda Shacabka ee Iowa

The Iowa Civil Rights Commission

Grimes State Office Building
400 E. 14th Street
Des Moines, IA 50319

515-281-4121
800-457-4416
FAX: 515-242-5840
https://icrc.iowa.gov/

Qoraalkan waxaa lagu sameeyey deeq ka timid Waaxda Horumarinta Guryaha Magaalooyinka Mareykanka, Barnaamijka Lagu Hirgeliyo in Loo Wada Siman Yahay Guryaha